

# Sida aad u agaasimaysid duritaankaaga daawada Pregnyl®

Waa inaad heshaa xirmo daawo oo ah Pregnyl kana kooban:

- 3 dhalooyin oo kala geddisan. oo ah dhalooyinka yar yar ee daawada oo qalalan kana kooban 5000 IU\* + 3 dhalooyin oo kala geddisan. oo ah dhalooyinka yar yar ee daawada oo dareere ka kooban.
  - Waxaa intaas dheer, waxaad u baahan tahay siliinge 2 ml ah, oo lagu xirayo irbad casaan ah taas mid wax lagu soo jidi karo isla markaana wax lagu qasi karo, iyo irbadda midabka cirrada oo kale leh oo loogu talo galay in duritaanka lagu sameeyo.
1. Soo qaado 2 dhalooyinka yar yar ee daawadu ku jirta ah (10,000 IU) iyo hal dhalo kale ah oo daawo dareere ah ku jirto.
  2. Dhooji xagga sare ee dhalada dareeruhu ku jiro si dareeruhu ugu dhaco gunta dhalada yar. Marka xigta jebi dabolka sare ee dhalooyinka daawadu ku jirto.
  3. Ku rakib irbadda casaanka ah siliingaha isla markaana kaga soo jiid dareeraha daawada ah ee ku jira dhalada.
  4. Ku wada shub dareeraha daawada ah oo dhan mid kamid ah dhalooyinka daawda ee qalalan. Hubso in boodharka dhammaantiis isku milmo.
  5. Marka xiga ka soo miir milanka mar labaad. Ku shub milanka dhalada kale ee qalalan, hubso in boodharku isku milmay, isla markaana ka soo miir mar labaad kuna shub siliingaha.
  6. Dhooji si aan wax hawo ahi u gerlin kadibna ku miir irbadda midabka cirrada oo kale leh.
  7. Duritaanka waxaa loo baxshaa qaab maqaarka hoostiisa ah oo lagu durayo baacugga maqaarkiisa sare isla sidii loo agaasimay duritaankaagii daawada Puregon. Duritaankaani wuxuu kugu keeni karaa dikaan iyo/ama guduudasho goobta ah oo aanu lahayn durutaankii daawada Puregon.

\*IU = Halbeegga Caalamiga ah